

# KA DIFAAC CUNUGAAGA CAABUQA DARAN EE RSV


January 2025

Feyriska neef mareynka (Respiratory syncytial virus (RSV)) waa caabuq feyris inta badan ku dhaca sambabaha. Waxa uu halis weyn ku yahay caruurta yaryar iyo dadka da'da ah. Waa waxa ugu badan ee caruurta yaryar isbitaalka loo dhigo. Nasiib wanaag, waxaa jiro labo hab oo looga difaaco caruurta caabuqa daran ee RSV, inta badan caruurta waxa ay u baahan yihiin mid un: tallaalka RSV ee la siiyo inta uu ilmaha uurka ku jiro ama difaaca RSV antibody, loo yaqaano nirsevimab, ilmahana la siiyo. Waxaa suurto gal ah in ilmahaagu u qalmo in lagu siiyo nirsevimab isbitaalka marka uu dhasho. Waxa ay siineysa **difaac degdegsiima** kana dhana RSV waxa ayna **ku jireysa ugu yaraan shan bilood**.

Haddii uu baahan tahay caawinaad in aad hesho ama fahanto xongtan, lasoo xiriiir [ahs.vdhimmunizationprogram@vermont.gov](mailto:ahs.vdhimmunizationprogram@vermont.gov).

**NIRSEVIMAB 90% WAXTAR AYEE U LEEDAHAY KA DIFAACIDA ILAMAHA IN ISBITAAL LOODHIGO CAABUQA DARAN EE RSV.**

## XAQIIQOYINKA RSV



- Xili waqtiyeedka RSV waxa uu bilaawda guga (fall) waxa uuna ugu daran yahay xiliga barafka (winterka).
- Waxaa leysku gudbin karaa marka qof qabo uu qufaco ama hindhiso, toos u taabato qof qaba RSV, ama aad taabato goob leh wasaqda caabuqa.
- Dad badan oo waaweyn misna qaba RSV wax calaamado ah kama muuqdaan. Kuwa ay ka muuqato waxa ay inta badan qabaan xanuun yar oo sidii hergabka oo kale ah.
- Ilamaha dhalaanka aadka u yar ee qaba inta badan marwalba waxa ka muuqdo calaamado. Kuwani waxaa kamida iscuncun, waxqabadko yaraada, cuno iyo cabitaan yar, iyo neef-qabad (apnea) (neefta oo joogsata in kabadan 10 sikin).
- RSV waxa ay ku keeni kartaa caruurta dhalaanka xanuuno daran sidoo kale ilmaha yarna burkiito (bronchitis) (barar xididada neefta ee sanbabaha) ama infekshinka sanbabaha (pneumonia).



**HealthVermont.gov/RSV**  
**802-863-7200**

 **VERMONT**  
**DEPARTMENT OF HEALTH**

## RSV ANTIBODY (NIRSEVIMAB)



- Antibody-ga RSV waxa la qaadanaya halmar kaliya.
- Waxaa loogu talloagalay caruurta 8 bil ka yar ee aan wali qaadan tallaalka difaaca uur kujirta ee RSV. Waxaa la siiya caruurta yaryar inta lagu jiro bilaha Oktober ilaa Maarso.
- Saameyntu inta badan waa wax yar degdega ku ba'eyso.